



## Waa maxay Qaybaha ay ku Takhasusto Early Achievers?

Waxaa mahadda iska leh Early Achievers, habka Qiimeynta Tayada iyo hagaajinta Washington, wuxuu hada waalidiinta u sahla inay si fudud u fahmaan nidaamka darajeynta si uu uga caawiyo sameysashada doorashooyin daryeelka carruurta oo xog dheeraad ah leh. Early Achievers waxay siisa taageero lacag la'aan ah iyo khayraad, sida tababro iyo tababarayaasha, bixiyayaasha daryeelka carruurta si ay ugu sameeyaan horumarin barnaamijyadooda. Nidaamka darajeynta tayada wuxuu ka caawiya qoysaska helitaanka barnaamijyada daryeelka carruurta ee ku hawlan dadaallada lagu hormarinayo tayada joogtada ah oo ay tayadoodu ansixisay jaamacadda Washington (UW). Qaar ka mid ah ka qaybgalayaasha Early Achievers ayaa ku takhasusay meelaha ugu muhiimsan koritaanka carruurta. Meelahaas ku takhasusida waxaa qorsheysa UW inta lagu jiro mudada qiimaynta goobta:



### Isdhexgalka iyo Bey'adda

Tani waa waayo-aragnimada ilmaha ee gudaha bey'adda waxbarashada. Waxaa uu tilmaamayaa isdhexgalka daryeelayaasha la leeyihiin carruurta iyo sida isdhexgaladaasi ay u abuurayaan taageero, cilaqaadka lagu hagaajinayo oo kor u qaada waxbarashada. Wuxuu sidoo kale tilmaamayaa sida ay barnaamijka daryeelka carruurta boosaskiisa, qalabka, jadwalka iyo nidaamka u habaysan yihiin si kor loogu qaado waxbarashada iyo ka hawl-gelinta carruurta. Ugu dambayn, waxa uu tilmaamayaa noocyo kala duwan oo qalabka waxbarashada iyo hawlaha carruurta loogu talagalay ee barnaamijku leeyahay.

### Manhajka iyo Taageerada Shaqaalaha

Tani waxay tilmaamaysa barnaamijka waxbarashada bixiyaha daryeelka carruurta uu hayo oo ka mid yihiin goolasha carruurta iyo qoysaska, iyo isticmaalaa iskaashiga qoyska si ay u caawiyaan waxbarashada carruurta. Wuxuu kaloo macnaheedu yahay in bixiyahani uu leeyahay manhaj waafaqsan Habka Waxbarashada Hore iyo Horumarinta ee Gobolka Washington oo wuxu taageeraa horumarinta carruurta iyo waxbaridda shakhsiga u qaaska. Ugu dambayn, waxay muujinaysaa inuu bixiyahani uu hubinayo in ay shaqaalahu helaan taageerooyin, waqtiga qorshaynta casharka iyo fursadaha tababarka.

### Aqoon xirfadeedka Shaqaalaha

Tani waxay tilmaamaysa horumarinta xirfadeed ee daryeelayaasha iyo macalimiinta. Waxaa loola jeedaa in shaqaalaha barnaamijkan leeyihiin tababaro muhiim ah oo waxbarashada sare, iyo in heerarka waxbarasho ee barnaamijka uu waafaqsan yahay tilmaamaha gobolka ee xirfadaha macalinka.

### Ku-hawlanaanta Qoyska iyo Iskaashiga

Tani waxay tilmaamaysa xiriirka uu bixiyaha la leeyahay qoysaska. Bixiyeyaashu waxay xiriir la samaystaan qoysaska carruurta daryeelkooda dhigata iyagoo habsanaya inay isgaarsiin joogto ah la yeeshaan, iyo siinaya qoysaska khayraad iyo taageero si ay carruurtoodu ugu gudbaan dugsiga barbaarinta (kindergarten).

### Natiijada Carruurta

Tani waxay tilmaamaysa horumarinta ula kac ah ee waxbarista iyo hawlaha soo buuxinaya baahida ilmaha u gaarka ah. Bixiyeyaasha ku guulaystay qaybtan waxay ilmaha siiyaan baaritaan si loo ogaado wixii walaac koritaanka ah ee suuragala, oo siiyaan qiimayn joogto ah si ay ula socdaan horumarka ilmo kasta. Macluumaadkan waxaa lala wadaaga qoysaska si kor loogu qaado u diyaargarowga dugsiga.

